

Sidan ayaad isku diwaan galin kartaa!

Waxaad noogu timaadaa xarunta isdhexgalka ee ku taalla Andra Långgatan 19. Saacadaha ay goobtu furan tahay waa 9 - 16 isniin ilaa jimcaha.

Hadii aad xiisanayso waxa kale ee aad soo wici kartaa tilifoon nambarka: 031-367 91 50 ama bogga aanu internatka ku leenahay ee www.goteborg.se/integrationscentrum.

Waxaanu kula soo xidhiidh doona marka kooxda dambe bilaabayso koorsada.

Namn:

.....

Personnummer (ÅÅÅÅMMDD-XXXX):

.....

Telefonnummer:

.....

E-post:

.....

Språk:

.....

Jag kan gå kurs på: Dagtid Kvällstid

Anmälan gjord av: Samma som uppgifterna ovan

Annan person: Namn, Telefonnummer, E-post:

.....

.....

.....



Adiga, ilmahaaga iyo qoyskaaga

- Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato sidii aad sare ugu qaadi lahayd ilmahaaga kalsoonidiisa iyo aragtida uu iska qabo/dareenka aragtida uu naftiisa ka qabo?
- Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato waxa aad waalid ahaan xuquuqda u leedahay iyo waxa waajib laguugu leeyahay ee dalkaan iswiidhan?
- Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato sidii aad caruurtaada xuduud ugu samayn lahayd ee aad isla markaana u xoojin lahayd xidhiidhka idinka dhexeeya?
- Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato sidii aad u wada shaqayn lahaydeen si aad u xoojisaan qoyska oo dhan?
- ▶ Halkan waxaad kula hadli kartaa dad kale oo soo maray ama ku jira xaaladdaada oo kale!



Ku soo dhawoow koorsadda loogu talo galay waalidka dalka ku cusub

Waalidiintu waxa ay la kulmi karaan ama arki karaan caqabado badan oo ay wadato waalidnimadu. Dadka oo dhami marmarka qaar tageero ayaay u baahdaan. Iswiidhan caadiyan walidiintu waxay ka qayb qaataan tageeroyin la siiyo walidiinta inta caruurta korayso.

Adigu hadaad tahay qof aan iswiidhan kusoo korin ee raba inuu ka qayb qaato koorsadda waalidiinta oo lagu qaadanayo afkaaga hooyo waxa jirta fursad ah inaad iska diwaan galiso koorsadda walidiinta dalka ku cusub.

Koorsadda waxa aad kula kulmi doontaa waalidiin kale oo aad kala sheekaysan doonto sida ay tahay in waalid lagu ahaado iswiidhan. Waxaad kulmaysan qiyaastii 8 jeer oo markiiba la wada joogayo 2,5 sacadood. Kulanka waxaa hogaaminaya qof ku hadla afkiina. Inta koorsadu socoto waxaad fursad u heli doontaa inaad la kulanto shaqaale ka socda xafiiska adeega bulshadda, xarunta daryeelka dhalinta, BVC (rugta daryeelka cafimaadka dhalaanka) iyo iskuulka.

Dadkii koorsadda hore uga qayb galay waxay ka sheegeen koorsadda walidiinta yimid wadan ku cusub iyo in waalid lagu ahaado iswiidhan:

"Waxaan u helay niyad fiican caruurtaayda koorsadda kadib. Hada waxaan dareemaya inaan qaadan karo kaalinta waalidnimada. Waxaan ahaa qof kale koorsada ka hor."

"Markii hore waanu kala fogayn aniga iyo caruurtaaydu. Hada heshiis ayaanu nahay oo waanuu isku soo dhawaanay."

"Waxaan dareemayaa in ilmahaygu maalin kasta ay korayaan, waanay la qabsadeen xaaladda, fikirkooduna is badalayo, aniguna waalid ahaan aan la qabsanayo sida ay u fikirayan. Waxana waajib igu ah inaan iyaga fahmo. Wiilasha iyo gabdhaha ba, waa inaan fahmi kara."

"Wax badan ayaanu kororsanay, laakiin aqoon hore ayaanu u lahayn sida caruurta loo barbaariyo oo aanu kala nimid dalaalkayagii hooyo, laakiin markii aanu nimid Iswiidhan ayaa baqasho na gashay. Tusaale ahaan waxaanu ka baqanaynay hadii aanu caruurta maqli wayno, ama hadii aanu usoo iibin wayno waxyaalo qaaliya in xafiiska adeega bulshada ayaa idinka qaadi."



"Caruurta su,aalahoodu waay badan yihiin, wixii ay hore usoo sameyeena ma qariyaan iyo wixii ku dhacayba."